

Abril 15, 2008

Waalidka/Wakiilada Qaaliga ah:

Aniga waxaan aad ugu faraxsanahay in aan ku soo ogaysiiyo fursada waxbarashada cawinaada dheeraadka ah oo ubadkaada ka helaayo Dugsiyada Dadweynha Seattle ee Xiliga Simistarka Kuleelaha 2008. Iyadoo saldhig looga dhigay qiimeynta wadajir ah talooyinka shaqaalaha iyo macalimiinta dugsiya, ubadkaada wuxuu xaq u leeyahay oo aan kugu martiqaadayaa in oo ka qaybgalo Barnaamijka Waxbarashada Simistarka Xiliga Kuleelaha.

Jadwalka

Barnaamijka wuxuu soconayaa Juunyo 25 ilaa Luulyo 31st, 2008 (ardayda waxaa la fasaxayaa Maalinta Xurnimada Luulyo 3rd-4th). Fasalada waxaa la dhiganayaa Isniinta ilaa Jimcaha todobaad kastaba. Waxaana xooga la saarayaa suugaanta iyo xisaabta ardayda ah fasalada 2nd, 3rd, 5th xiliga sanad dugsiyeedka 07-08. Ahmiyada koowaad waxaa la siinayaa gaaritaanka xirfada heerka aqoonta ardayda looga baahan yahay. Barnaamijka waa lacag la'aan oo bilaash ah, waxaana kugu dhiiragalinayaa fursadaan in aad ka faa'iidayso.

Quraacda waxaa la siinayaa 8:30 gh ilaa 8:55 gh. Fasalada waxay bilaawanayaan 9:00 gh. Qadada waxaa la bixinayaa Duhurkii 12:00 ilaa 12:30 gd. Ardayda dugsiya wuxuu u dhamaanayaa 12:30.

Gaadiidka

Fasalada waxaa lagu qabanayaa goobo fara badanee nawaaxiga degmadda. Ardayda waxaa lagu qorayaa goob u dhaw adareeska gurigooda ee xiliga kuleelaha. Ardayda waxaa qaadaayo basaska jaalaha ah haddii ay ku nool yihiin nawaaxi ka basan xuduuda dhugsiga loogu socdo. Haddii ubadkaada xaq u yeesho gaadiidka, waxaa helaysaa warqad lagu soo diri doono dhamaadka bisha Juunyo. Basaska ardayda waxay ka qaadayaan adariska goobaha joogsiga, waxaana ardayda lagu soo celinayaa goobta galabtii. Ma jiri doono u adeega geenta albaabka guriga (ilaa mooyee oo ansixiyo Hay'adda Gaadiidka).

Haddii aad xiisaneyso fursadaan, fadlan soo buuxi foomankaan akhbaaraha ee warqadaan ku lifaaqsan, fadlan hubi liiska adareeska aad isticmaalaysid xiliga kuleelaha. Ugu dambeeyn ugu soo celi foomanka Maajo 16, 2008. Boosaska barnaamijka xiliga kuleelaha way xadidan yihiin, waxaana kugu haboo si dhaqso ah u soo celiso foomanka ku lifaaqsan warqadaan.

Daacadnimo,

Glenda L. Morgan
Maamulaha Barnaamijka Xiliga Kuleelaha